OREGON
DEPARTMENT OF
EDUCATION
*Oregon achieves . . . together!*

# Su'aalaha badanaa la iska waydiiyo Qaybta 504 FAQ ee Dugsiyada Oregon


Su'aalaha badanaa la iska waydiiyo Qaybta 504 FAQ ee Dugsiyada Oregon ....... 1

Ardaydee ayaa lagu difaacaa Qaybta 504? ....... 2

Waa maxay "naafo jireed ama maskaxeed"? ....... 2

Waa maxay macnaha "xadidaad la taaban karo"? ....... 2

Helitaanka naafadu ma lagama maarmaan ayay u tahay ardayga si loo go'aamiyo inuu qabo naafo ku cad Qaybta 504? ....... 2

Waa maxay "u qalmida farsamo"? ....... 2

Naafada ku meel gaarka ah ma loo arkaa inay tahay naafo sida hoos timaada Qaybta 504? ....... 3

Waa maxay qiimeynta 504? ....... 3

Waa maxay FAPE? ....... 3

Waa maxay "meelayn"? ....... 3

Yaa go'aaminaya u-qalmitaanka iyo meelaynta? ....... 3

Waa maxay doorka waalidka/daryeelaha ee go'aan qaadashada Qaybta 504? ....... 3

Ma jiraan xeerar ama shuruuc u baahan isticmaalka hab gaar ah ama foomamka 504? ....... 3

Yaa noqon kara Isku-duwaha 504? ....... 4

Maxaa la gudboon degmo ama dugsi marka waalidka/daryeeluhu codsado qiimeynta 504? ....... 4

Waa maxay adeegyada ku habboon ee laga yaabo in lagu daro Qorshaha 504? ....... 4

Ardaygu ma u baahan yahay IEP iyo Qorshaha 504 labadaba? ....... 4

Ardaygu ma u baahan yahay Qorshaha Daryeelka Caafimaadka Shakhsi ahaaneed (IHP) iyo Qorshaha 504 labadaba? ....... 4

Ma loo baahan yahay dib u qiimeynta Qaybta 504? ....... 4

Goorma ayaa ardayga laga saari karaa adeegyada 504? ....... 5

Oregon ma leeyahay sharci u gaar ah oo khuseeya ardayda 504 u qalanta? ....... 5

Waa maxay noocyada cabashooyinka la xarayn karo ee ku saabsan takoorka lagu mamnuucay qaybta 504? ....... 5



*Su'aalaha la isweyddiiyo waxaa soo saartay Waaxda Xuquuqaha Madaniga ee Waaxda Waxbarashada Oregon. Ma samaynayso talo sharci mana aha in sidaas loo fasirto. La xiriir [ode.civilrights@ode.oregon.gov](mailto:ode.civilrights@ode.oregon.gov) wixii macluumaad dheeraad ah. Dib loo eegay 11/26/25.*

## Ardaydee ayaa lagu difaacaa Qaybta 504?

Qaybta 504 waxay daboolaysaa ardayda naafada ah ee u qalma ee dhigta dugsiyada helaya kaalmada maaliyadeed ee dawladda dhexe. Qaybta 504 ayaa ku qeexda arday u qalma oo naafo ah sida:

1. Qof qaba cilad dhanka jirka ama dhimirka ah taasoo si wayn u xadidaysa hal ama ka badan oo kamid ah hawlaha waawayn ee nolosha; ama
2. Leh diiwaanka naafada noocaas ah; ama
3. In loo arko inaad qabto naafada noocaas ah

## Waa maxay "naafo jireed ama maskaxeed"?

Xeerarka Qaybta 504 ma dejiyaan liis dhammeystiran oo xaalado gaar ah oo laga yaabo inay ka dhalan karaan naafada jidheed ama maskaxeed sababtoo ah dhibka ay leedahay hubinta dhammaystirka liiskaan. Go'aaminta in ardaygu leeyahay naafo jireed ama maskaxeed oo si weyn u xaddidaysa dhaqdhaqaaqa nolosha waa in loo sameeyaa si gaar ah, iyada oo dhammaan xogta la xidhiidha ay tixgeliyaan, oo ay go'aamiyaan Kooxda 504.

## Waa maxay macnaha "xadidaad la taaban karo"?

Qaybta 504 ma bixiso qaacido ama miisaan lagu cabbiro xaddidaad la taaban karo. Hase yeeshee, Sharciga Maraykanka ee Dadka Naafada ah (ADA) ayaa muddo dheer ku qeexay "xaddidaad la taaban karo" inay tahay in qofku aanu awoodin ama si weyn ugu xaddidan yahay xaaladda, qaabka ama muddada uu ku fulin karo hawlaha nolosha ee ugu weyn marka la barbardhigo qofka caadiga ah. “Qofka caadiga ah” waxaa loola jeedaa caadiyan da'da ama heerka fasalka ardayga guud ahaan dadweynaha, sida gobolka ama dalka. Isbarbardhigga **laguma saleeyo** kartida ardayga, walaalaha ardayga, ama ardayda kale ee fasalka ama dugsiga.

## Helitaanka naafadu ma lagama maarmaan ayay u tahay ardayga si loo go'aamiyo inuu qabo naafo ku cad Qaybta 504?

Maya. Sida ku cad Qaybta 504, degmadu waa inay qiimeysaa arday haddii degmadu ay ogtahay ama ay ka shakisan tahay in ardaygu uu qabo naafo. Degmadu waxay codsan kartaa in waalidku bixiyo macluumaadka caafimaadka ama waxay codsan kartaa oggolaanshaha waalidka si ay xogta caafimaadka si toos ah uga hesho dhakhtarka, haddii macluumaadkaasi hore u jiray. Hase yeeshee, haddii degmadu ay ka shakido naafonimo oo waalidku aanu awoodin inuu bixiyo macluumaadkan, oo degmadu aamisansan tahay in macluumaadkaan uu yahay mid lagama maarmaan u ah si loo go'aamiyo in ardaygu naafo yahay iyo in kale iyo in waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha loo baahan yahay, degmadu waa inay ka caawisaa waalidka helitaanka macluumaadkan, xitaa haddii ay kharash ku bixinayso degmadu.

## Waa maxay "u qalmida farsamo"?

Maaddaama Xeerka Wax-ka-beddelka ADA (ADAAA) (2008) u qalmidda Qaybta 504 kuma xidhna baahida adeegga, ardayda u-qalanta laakiin aan u baahnayn adeegyada waxaa mararka qaarkood lagu tilmaamaa arday “farsamo ahaan u-qalma”. Inta badan, ardaydaan waxay xaq u leeyihiin sida ku cad "diiwaanka" ama "loo tixgaliyo" kuwo u qalma Qaybta 504. Ardayda farsamo ahaan u qalma waxaa la siiyaa ilaalinta xuquuqaha madaniga ah ee Qaybta 504.

---

## Naafada ku meel gaarka ah ma loo arkaa inay tahay naafo sida hoos timaada Qaybta 504?

Naafada ku meel gaadhka ah waxa loo qaadan karaa naafo ahaan ayadoo ku xiran xaalad kasta. Haddii naafada ku meel gaadhka ah ay aad u daran tahay oo ay si xad dhaaf ah u xaddidayso hawl nololeed oo weyn tahay, markaas waxa loo qaadan karaa naafo hoos timaada Qaybta 504.

## Waa maxay qiimeynta 504?

Qiimeynta 504 waxay caadi ahaan ku bilaabataa dib u eegis lagu sameeyo macluumaadka jira sida macluumaadka uu bixiyo waalidka; qiimayn kasta oo uu dugsigu sameeyo; macluumaadka laga helo bixiyayaasha daawaynta ardayga, haddii ay jiraan; diiwaanada tacliinta; diiwaanada imaanshaha; natiijooyinka qiimeynta gobolka, iwm. Qiimayntu waxay noqon kartaa mid ballaadhan, oo ay ku jirto xogta guusha, liiska hubinta dabeecadda iyo cabbirada kale, ama mid khulaaso ah sida xogta caafimaadka. Qiimayntu waa inay ahaataa mid ku filan si loo go'aamiyo haddii ardaygu naafo yahay sida ku cad Qaybta 504, iyo haddii ay sidaas tahay, in ardaygu u baahan yahay Qorshaha 504 si uu u helo ugana qayb qaato faa'iidooyinka waxbarashada dadweynaha.

## Waa maxay FAPE?

FAPE waxay u taagan tahay "waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo ku habboon". Ardayda naafada ah waa inay ku helaan waxbarasho iyo adeegyo la xiriira kharash la'aan, marka laga reebo khidmadaha caadiga ah ee dhammaan ardaydu bixiyaan. "Habboon" macnaheedu waa waxbarashada iyo adeegyada la xidhiidha waa inay buuxiyaan baahiyahooda gaarka ah si la mid ah kuwa ardayda aan naafada ahayn.

## Waa maxay "meelayn"?

Meelayntu asal ahaan waa waxbarashada iyo adeegyada la xidhiidha ee la siiyo ardayga naafada ah, iyo goobta uu ardaygu ka helo adeegyadaas. Meelaynta waxaa loo qaabayn karaa sida Qorshaha 504.

## Yaa go'aaminaya u-qalmitaanka iyo meelaynta?

Hay'adda kaliya ee go'aan qaadashada la ogol yahay waa kooxda 504 oo ka kooban koox dad aqoon leh: qof aqoon u leh ardayga, qof aqoon u leh xogta qiimeynta, iyo qof aqoon u leh fursadaha meelaynta. Go'aan gaarista hal dhinac waa mamnuuc sida uu dhigayo xeerka Qaybta 504.

## Waa maxay doorka waalidka/daryeelaha ee go'aan qaadashada Qaybta 504?

Iyada oo ku xidhan nidaamka ay degmadu qaadatay, waalidku waxa ay u badan tahay in uu yahay xubin lagu martiqaaday kooxda 504 waxana laga yaabaa in uu ku lug yeesho go'aan qaadashada kooxda ku salaysan. Waalidku waa inuu bixiyaa oggolaanshaha qiimeynta 504 iyo meelaynta hore ee ilmahooda (fulinta qorshaha 504 ee bilowga ah).

## Ma jiraan xeerar ama shuruuc u baahan isticmaalka hab gaar ah ama foomamka 504?

Degmooyinka deeqaha qaata waa in ay dhistaan hanaan u gaar ah iyo habraacyo u hoggaansan Xeerarka fulinta qaybta 504 ee dugsiyada hoose/dhexe iyo sare.  ODE waxay ku siisaa foomamka tusaale ikhtiyaari ah ee webseedka Ilaha Iskuduwayaasha Qaybta 504.

---

## Yaa noqon kara Isku-duwaha 504?

Degmo kasta oo deeq qaate ah waa inay magacawdaa shaqaale si uu u kormeero u hoggaansanaanta Qaybta 504, oo loo yaqaan Isuduwaha 504. Isku-duwayaasha 504 inta badan waxay leeyihiin wakiilo heer dhismeed ah si ay u fududeeyaan hanaanka 504 ee arday gaar ah. Xubnahan sida caadiga ah ma laha madax-bannaanida iyo awood ay iskugu dubbaridaan dhammaan waajibaadka 504, sida ka jawaabista cabashooyinka iyo samaynta baaritaannada xuquuqda madaniga ah. Kala cadeynta doorarku waa lama huraan.

## Maxaa la gudboon degmo ama dugsi marka waalidka/daryeeluhu codsado qiimeynta 504?

Degmadu waxay sii wadan kartaa habraaceeda la dejiyay si ay ugu qiimeyso ardayga u qalmitaanka 504 ama way diidi kartaa inay qiimeyso. Hase yeeshee, degmadu waa inay bixiso ogaysiis qoraal ah oo ku saabsan go'aanka oo ay siiso waalidka/daryeelaha nuqul ka mid ah nidaamka ilaalinta ee Qaybta 504, oo ay ku jirto ikhtiyaarka lagu xareynayo cabashada.

## Waa maxay adeegyada ku habboon ee laga yaabo in lagu daro Qorshaha 504?

Adeegyada *lagama maarmaanka* u ah ardayga si uu uga qaybqaato ugana faa'iidaysto barnaamijka waxbarashada degmada marka loo eego ardayda aan naafada ahayn ee guud ahaan dadweynaha. Kuwaan waxay noqon karaan adeegyo waxbarasho ama deegaan, wax ka beddelka siyaasadda ama nidaamka, ama adeegyada la xidhiidha.

## Ardaygu ma u baahan yahay IEP iyo Qorshaha 504 labadaba?

Maya. Dhammaan ardayda naafada ah ee hoos timaada IDEA waxay helayaan ilaalinta xuquuqda madaniga ah ee lagu baxsho Qaybta 504. Dhammaan qaybaha barnaamijka waxbarashada ardayga waa in lagu daraa IEP.

## Ardaygu ma u baahan yahay Qorshaha Daryeelka Caafimaadka Shakhsi ahaaneed (IHP) iyo Qorshaha 504 labadaba?

Maya. Ardayda qaba xaalado caafimaad oo aan buuxinayn qeexida naafada ee ku cad Qaybta 504, Qorshaha 504 looma baahna. Ardayda qaba xaalado caafimaad oo u baahan daryeel caafimaad dugsiga oo loo tixgelin doono naafada ku cad Qaybta 504, IHP waa in lagu xiraa qorshahooda 504.

## Ma loo baahan yahay dib u qiimeynta Qaybta 504?

Xeerarka Qaybta 504 waxay u baahan yihiin in dib-u-qiimeynta la sameeyo si goos-goos ah, taasoo loo tarjumi karo saddexdii sannadoodba mar ama sida loo baahdo. Degmooyinku waa inay sidoo kale sameeyaan dib-u-qiimeyn kahor inta aan la beddelin meeleyn la taaban karo, oo ay ku jirto ka saarida barnaamijka waxbarashada in ka badan 10 maalmood sannad dugsiyeedka, ka wareejinta arday nooc ka mid ah barnaamij oo loo wareejiyo mid kale, ama joojinta ama si weyn u dhimista adeeg la xiriira. Dib-u-eegista Qaybta 504 laguma qeexin xeerarka. Waxa laga yaabaa in ay noqoto dhaqanka ugu wanaagsan in degmadu ay qaadato habraac sanadle ah oo lagu ogeysiinayo waalidiinta xuquuqdooda iyo ilaalintooda nidaamka iyo bixinta 504 dib u qiimayn haddii baahiyaha la xidhiidha naafada ee ardayga ay isbedelaan.

## Goorma ayaa ardayga laga saari karaa adeegyada 504?

Kooxda 504 waxay u baahan doonaan inay go'aan ka gaaraan, ayagoo u maraaya dib u qiimayn, haddii ardaygu aanu hadda lahayn naafo ama xaddidaad si uu u helo. Hase yeeshee, sabab la xiriirta in laga yaabo in ardaygu uu haysto diiwaan ama loo arko inuu qabo naafo, ardaygu weli waxaa laga yaabaa inuu farsamo ahaan u qalmo.

## Oregon ma leeyahay sharci u gaar ah oo khuseeya ardayda 504 u qalanta?

Haa. Waxa ugu muhiimsan waa qaanuunka Barnaamijka Maalinta Dugsiga ee la soo gaabiyey (ORS 343.321 to 343.333); Qiimeynta Habdhaqanka Shaqaynaysa iyo qorshayaasha Wax ka qabashada Habdhaqanka (ORS 343.154); Tusaale Xeerka (OAR 581-021-0009); iyo sharciga Mamnuucidda Takoorka iyo xeerka (ORS 659.850; OAR 581-021-0045).

## Waa maxay noocyada cabashooyinka la xarayn karo ee ku saabsan takoorka lagu mamnuucay qaybta 504?

Cabashooyinka takoorka waxaa lagu xareyn karaa heer degmo waxaan racfaan loogu diri karaa ODE. Cabashooyinka takoorka waxa kale oo loo gudbin karaa Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah (OCR) marka ugu horraysa. Waalidiinta/masuuliyiinta waxaa kale oo laga yaabaa inay codsadaan dhageysi nidaam cadaalad ah oo ku saabsan aqoonsiga, qiimeynta, ama meelaynta ardaygooda naafada ah sida ku cad Qaybta 504. Xadgudubyada Barnaamijka Maalinta Dugsiga ee la soo gaabiyey waxa laga yaabaa in lagu dacweeyo ODE iyada oo loo marayo iimaylka. Ugu dambeyntii, Qaybta 504 iyo Title II ee ADA waxay ogol yihiin dacwadaha madaniga ah.